CARDIFF
HEALTH ALLIANCE
CYNGHRAIR IECHYD
CAERDYDD

LA KULANKA TARTANKA

ISTARAATIIJIYADDA CAAFIMAADKA, DARYEELKA BULSHADA IYO LADNAANTA EE CARDIFF
2005-2008

SOO KOOBID

GOGOLDHIG

‘La kulnka Tartannka’ ee Cardiff waa Istaraatiijiyadii u horeeyey ee Cafimaadka, Daryeelka Bulshada iyo Ladnaanta. Waxaana loo sameeyey jawaab celinta qaynuunka isku-darka cusub ee laga rabo Golaha Cardiff iyo Gudida Caafimaadka ee Degaanka Cardiff, gundhigeeduna waa waajihaad is kaashi ah oo hore loogu marinayo caafimaadka iyo ladnaanta iyo in ay yarayso cadaalad la`aanta ka jirta dhamaan magaalada, adeegyada mudnaanta caafimaadka iyo daryeelka bulshadana in loo bixiyo si siman oo waxtar leh.

Waxaanu tijaabinay in aanu wax soosaar cusub ku waajahno sameynta Istaraatiijiyadan. Masuuliyada soosaarida Istaraatiijiyadan waxaa awood loo siiyey Isbahaysiga Caafimaadka ee Cardiff oo ay ku shuraakoobeen Dowlada Hoose, Wasaarada Caafimaadka Qaranka (NHS) iyo Waaxda Iskaa Wax-u Qabso.

Nidaam balaadhan oo ah la tashi iyo isu-imaatin ayaa dhex u ahaa waajahaadii lagu sameeyey Istaraatiijiyada. Waxaa ka qayb qaatay jaaliyada balaadhan ee Cardiff iyo weliba saamilayaal muhiim ah. Sidan waxaa ku tusaya gebo-gebada uu gaadhay Derek Wanless ee `Dib-u baadhida Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Wales’ magac ahaan ku baraarujinta baahida in aanay wanaajin caafimaadkooda oo keliya ee in la sameeyo nidaamka dib-jihaynta adeega caafimaadka iyo daryeelka bulshada. Istaraatiijiyadan waxa kaloo lagu daabakhay qiimaynta raad-reebka sinaanta jinsiyada ee la xidhiidha Hagaajinta Sharciga Sinaanta Jinsiyada.

Sidaas darted natiijada u soo baxday Istaraatiijiyada Cardiff waxay cadaynaysaa aragti isku-xidhan ee qaabka mustaqbalka fog ee caafimaadka iyo daryeelka bulshada dhamaan magaalada, tasoo toos ugu jawaabaysa baahiyaha degaanka iyo iyadoo sameeynteedu ahaa wadashaqayn ka dhaxaysa iskaashatada iyo jaaliyada badankood. Istaraatiijiyadani waxay diyaarinaysaa wax-qabad xidhiidhinaaya horumarinta caafimaadka, dhinaca kalena waxay si mayal adag u bedelaysaa adeega wax-bixinta ee loogu talo galay degenayaasha magaalada.

Councillor John Dixon
Executive Member Cardiff Council
Chair Cardiff Health Alliance

Dr Rob Jones
Chair Cardiff Local Health Board
Vice-Chair Cardiff Health Alliance

Soo koobidani waxay diyaar ku yahiin luqadah jaaliyada ka la duwan ee liiska hoos **www.cardiffhealthalliance.org**

Chinese (Cantonese)
Arabic
Bengali
Farsi
French
Gujerati
Hindi
Kurdish
Punjabi
Somali
Urdu

Soo koobidan nuqulo dheeraad ah waxaad ka heli kartaa:

Christine Jenkins
Cardiff Health Alliance
Social Care and Health
Room 337, County Hall
Atlantic Wharf
Cardiff, CF10 4UW
Tel: 029-2087 3830
Fax: 029-2087 3851
E-mail: healthalliance@cardiff.gov.uk
Website: www.cardiffhealthalliance.org

HORDHAC

Tani waa nidaamkii Istaraatiijiyadii u horeeyey ee Caafimaadka, Daryeelka Bulshada iyo Ladnaanta ee Cardiff loona sameeyey jawaab celinta qayniinka isku-darka cusub ee laga rabo Kawnsalka Cardiff iyo Gudida Caafimaadka ee Degaanka Cardiff. Waxay diyaarinayaan, yagoo degaan ahaan u wada shaqaynaya, ururadu qorsheynayaan siyaalo hore loogu marinaayo caafimaadka iyo ladnaanta dadka Cardiff 3da sano ee soo socda. Waxqabadka lagu gaadhayo sidani waa isu miisaamid u dhaxeeya cabiraad sare loogu qaadayo iyo horumarinta caafimaadka iyo yaraynta sinaan la`aanta caafimaadka iyo in la hubiyo in adeeg taxan oo balaadhan ay dadka diyaar u yahiin marka ay u baahan yahiin.

Samayntii lagaga heshiiyey mudnaanta soona maray Istaraatiijiyada naiijadii ka soo baxday waa:

- Qiimayn balaadhan oo ah baahiyaha caafimaadka iyo ladnaanta jaaliyada.
- Waajahaad cusub sida loola shaqaynayo shikhsiyaadka iyo ururada, oo ay ka midka yahiin isticmaalayaasha adeegyada iyo jaaliyada balaadhan si loo cadeeyo waxqabadka loo baahan yahay.
- Balanqaad heerka sare ay isugu-duwaan waxqabadka u dhaxeya iskaashatada degaanka.
- In laga fekero Istaraatiijiyad qaran iyo waxqabadka looga baahan yahay degaanka sidii loo gaadhi lahaa.



Istaraatiijiyadani waxa ay cadaynayaa in qodobada soo socdaa yahiin furaha mudnaanta:

- Caafimaadka Maskaxda
- Dadka Da`ada ah
- Caruurta iyo Dhalinyarada
- Jaaliyadaha baahiyaha khaaska ah haysta (Madowga iyo Jaaliyadaha laga badan yahay, Hoylaawayaasha, Magan-gelyo Doonka, Midgaha iyo kuwa Guur-guura)
- Horumarinta habka Nolosha iyo ladnaanta (Sigaar cabista, Buurnaanta/xadhaafka ah, Caafimaadka Galmada, Ka Hortaga Shilalka)
- Fidinta Isticmaalka Khayraadka iyo Daryeelka bulshada

Mudnaantaas la xaqiijiyey waxaa saldhig u ah qaynuunada soosocda:

- U baahnaanta in la yareeyo sinaan la`aanta caafimaadka – sinaan la`aanta ka dhaxaysa jaaliyadaha Cardiff.
- Ka qayb-gelin iyo awood siin shikhsiyaadka iyo jaaliyadaha Cardiff – si ay wax ugu darsadaan horumarinta caafimaadkooda iyo ka qaybqaadashada qorsheynta adeegyada.
- Soo dhexgalka hore si looga hortago in dadka uu ku yimado xanuun ama awood daro.
- Waajahaada nidaamka dhamaan si loo hubiyo kuli adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshadu in ay fiiro gaar ah u yeeshaan baahiyaha shikhsiyaadka.
- Isku-xidhnaanta adeegyada kale (Guriyanta,Gaadiidka iwm) si loo hubiyo in qorshaynta goobaha kale ay ku xisaabtamaan baahiyaha caafimaadka iyo ladnaanta.

Wax-qabadka la muujiyey waxaa loogu talogalay in la:

- Sameeyo adeegyo casri ah oo xidhiidhsan si toos ahna uga jawaaba baahiyaha degaanka.
- Bixinta mudnaanta cad oo ka war-bixisa sida loo kharash gareeyey maalgelinta
- Hubiyo khayradka caafimaaka iyo daryeelka bulshada in loo isticmaalay sida ugu Wax-tar wanaagsan.
- Diyaariyo himilooyin lid ku ah horusocodka dabagalka lagu samayn karo.

SIDEE LOO SAMEEYEY ISTARAATIIJIYADAN?

Sameynta Istaraatiijiyadan waxaa ka qayb qaatay shakhsiyo iyo ururo balaadhan oo kala duwan. Qaab-dhismeedka guud ee loo sameeyey Istaraatiijiiyadan, nidaamka la isticmaalay iyo furaha muhiimka ah ee ay dhexdooda ka sameeyeen Istaraatiijiyadan iyo horu-socodka nidaamada kale waakan soosocda:

Qaabka	Nidaamka	Xidhiidhka
• Isbahasiga Caafimaadka isla markaasna ah furaha Istaraatiijiyada shuraakada Cardiff ee loogu talo galay caafimaadka iyo ladnaanta, ayaa wadey Istaraatiijiyadan. • Isu-taga caafimaadka iyo Kooxaha la Taliyayaasha Qorsheynta daryeelka iyo Isu-taga Gudida Fulinta ayaa masuul ka ahaa samenta kooxah macmiisha soo jeedintooda gaarka ah. • Kooxo kooban oo ah wakaalado qaybo badan leh ayaa loo sameeyey in ay dhameeyaan qaybo shaqo oo muhiim ah kuna wareegsan Istaraatiijiyada. • Cutub isu-imaatin ah iyo shaqaale ka yimi Gudida Caafimaadka Degaanka Cardiff iyo Waaxda Iskaa wax-u Qabso ee Cardiff ayaa loo sameeyey taageerada guud ee nidaamka sida wax loo qabanayo	• Isticmaalayaasha adeega, daryeelayaasha iyo wakiilada jaaliyada ayaa ka qayb qaatay 2 marxaladood oo muhiim ah iyagoo isticmaalaya nidaamka la tijaabiyey ee `Jihaynta u Horeysa ee Daryeelka Bulshada`. • La tashiga Qiimeynta Baahiyaha waxaa la soo mariyey afar masnac oo ah `Odhaahdaada Dhiibo` oo lagu qabtay midkasta degaanada Cardiff. Waxaa joogay oo ka qayb qaatay ilaa 200 oo ka kala yimi shaqaalaha hawl fulinta caafimaadka iyo qaybta daryeelka bulshada iyo wakiilada jaaliyada iyo kooxaha waaxda iskaa wax-u qabso. • Soo jeedinta lagu sameeyey Istaraatiijiyadan waxaa ka mid ahaa masnac ah `Hadal ha lagu bedelo Ficil`oo ay yimaadeen 165 oo qof. Kuwaas oo fiiro gaar ah lagu saaray in ay ku qanciyaan dadka degen kana shaqeeya Cardiff in ay muujiyaan xal u helid degaanka ah ee arimaha degeenka oo ay gaadhsiiyaan kooxaha qorshaynta caafimaadka iyo daryeelka bulshada.	• Xidhhidh isku dhow ayaa lala sameeyey Istaraatiijiyada Jaaliyada Cardiff, tasoo sare u qaadaysa dhaqaalaha bulshada iyo wanaagsanaanta degaanka ee magaalada. • Xadhidh muhiim ah ah ayaa lala wada sameeyey shuraakooyin balaadhan iyo Istaraatiijiyadaha hawl fulinta oo hoos yimaada dalada Istaraatiijiyada Jaaliyada kuwaas oo tilmamaya arimo balaadhan oo kala duwan saameyna ku leh Guryaha, Gaadiidka iyo Amniga Jaaliyada. • Qorshaha Wax-qabadka Degaanka ee Cardiff Wanless (WLAP) iyo Istaraatiijiyada sameeyntoodu way is bar-bar socotay. • WLAP waxaa laga soo diyaariyey moqiifka koobaad ee Istaraatiijiyada waxayna qayb lagama maarmaan ah u tahay joo jeedinta Istaraatiijiyada.

GOOBAHA DEGAANKA

Maxaanu ka Ognahay Baahiyaha Cardiff?



Marxaladii u horeeysey ee hawl fulinta Istaraatiijiyada waxaa la qaaday dhamaan qiyaasta baahiyaha caafimaadka iyo ladnaanta dadka degaanka. War-bixin faah-faahsan oo ah natiijada ayaa la soo saaray Maarso 2004. nuqul dhamaystiran waxaa laga heli karaa shebekada internetka ee **www.cardiffhealthalliance.org**.

Bulshda Wakhdigan Xaadirka ah

Cardiff waxay ka kooban tahay 29 qaybood oo laga codeeyo oo ay wadarta bulshadu tahay 343,289 marka la eego Maamulka Diiwangelinta Wasaarad Caafimaadka Qaranka. Waxaa la saadaalinayaa in korida bulshada Cardiff ka dhacdo degaanka Koonfur-Bari. Qaabka guud ee da`aha bulshada Cardiff hoosta ayey ku yaaliin. Waxay leedahay saami aad u sareeya ee dhalinyarada da`ahoodu tahay 15 ilaa 24 marka loo eego Wales kuli sababata oo qaybi tahay tiro balaadhan oo arday ah. Waxay kalo leedahay saami hoose dadka da`aha hawl-gabka ah marka loo eego isku celceliska Wales, iyo saami waxyar sareeya ee dadka da`aadoodu tahay 0 ilaa 15 jir.

Bulshada Cardiff ee Da`aha iyo Jinsiyada oo Lagala soo Baxay NHSAR 2001



Furaha xaqiiqada la muujiyey ee macluumaadka tiro koobka waxaa ka mid ah:

- **Farqiga Gudaha iyo ka u Dhaxeeya Deegaanada -** waa xaqiiq in laba Cardiff oo aan isku mid ahayn jiraan: qaybta waqooyi ee magaalada oo saami barwaaqo ah iyo dhanaca lagu sifayn karo ‘dhigta koonfur’ oo ay saameyso wax la`aan ah heer sare oo noocyo badan leh. Dhumucda bulshada Cardiff ayaa sabab u ah heerka sare ee wax la’aanta ‘dhigta koonfur’ oo saameysa in ka badan 120,000 oo qof iyo caruur ka badan 16,000 ay ku nool yahiin fakhri.
- **Dhalinyarada iyo Dadka Waaweyn -** Gebi ahaan Cardiff marka la barbar dhigo Wales waxay in yar ka sareeysaa saamiga dadka da`adoodu tahay 0 ilaa 15 jirka, wax yarna waxay ka sareeysaa dhalinyarada da`adoodu tahay 15 ilaa 25 laakiin waxay ka hoosaysaa saamiga dadka da`ada hawl gabka ah. Kooxahani waxay u badan yahiin isticmaalayaasha ugu weyn ee adeega caafimaadka iyo daryeelka bulshada.
- **Arimaha Magaalada -** Cariff waxay soo jiidataa kooxo khaas ah oo inta badan haysta baahiyaha caafimaadka iyo ladnaanta oo xadidan kalana duwan. Kuwaas ay kamid yahiin bulshooyinka jinsiyada laga badan yahay, midgaha iyo kuwa guur-guura, hoylaawayaasha, ardayda, magan-gelyo doonka iyo qaxoontiga, kuwa galmada ku shaqaysta iyo maxaabiista. Jaamacada Cisbitaalka Wales oo ah goob khibrad khaas ah leh ayaa iyana soo saartay dad haysta baahiyo xadidan.
- **Kala Duwanaanta Caafimaadka -** Degaanka Koonfur Bari waxay si gaar ah u leedahay dhamaantood cadad sare sababaha dhimashada ka hooseeya da`ada 75 sano, cadad sare hoosaynta miisaanka caruurta dhalata iyo cadad sare dadka guryaha ku wada nool ee ay hayso awood yaraan ka timi xanuunada dabada dheer kasoo soo farageliya kartida ay ku fulin lahaayeen hawlahooda, waxqabadka ama madax-banaanidooda.
- **Arimaha Saameeya Caafimaadka –** Cadaalad daro badan ayaa laga helay gudaha iyo degaanada dhexdoodaba. Taas oo ay ka mid yahiin toban laab kala duwanaanta u dhaxeeya cadadka shaqo la`aanta goobaha magaalada iyo cadadka qayaxan ee u dhaxeeya caruurta ku nool guryaha qaata dakhliga gargaarka.

Qiimaynta Sifooyinka Baahiyaha

Macluumaadkan waxaa laga soo qaaday sifooyinka macluumaadka ay ka midka ahaayeen la tashigii masnacii ‘Odhaahdaada Dhiibo ,‘ masnacii Shirka Dhalinyarada ee ‘waa Mustaqbal kaagii ee adigu Go`aanso’ iyo la tashigii su`aalaha qoraalka ahaa. Masnacyadaasi waxay isticmaaleen nidaaka la tijaabiyey ee ‘Jihaynta u Horeeysa Daryeelka Bulshada’, in ay ka qaybqaatayaashu si macno leh uga mid noqdaan sameeynta mudnaanta iyo soo jeedinta Istaraatiijiyada. Waxaa baadhitaan lagu sameeyey lixda mudnaanood ee masnac kasta laga muujiey si loo diyaariyo gebo-gebada guud ee arimaha la soo qaaday. Waxaa degaanada ka jira arimo cadaan ah oo ay iskaga mid yahiin iyo kuwo ay ku kala duwan yahiinba, 9 mowduuc ayaa laga soo qaaday 24 ka mudnaanood ee la cadeeyey. War-bixin dhamaystiran oo ah masnacyada ayaa lagu soo ban-dhigay boga mareegtada internetka ee Isbahaysiga Caafimaadka.

- Baahiyaha Dadka Da`ada ah
- Guriyanta iyo Gogol Sinta
- Isku-xidhnaanta Jaaliyada ee Dhisida Guryo Cusub
- Baahiyaha Dhalinyarada
- Baahiyaha Qoysaska Dhalinyarada ah
- Jihaynta u Horeysa ee Adeegyada Daryeelka
- Denbiyada iyo Ka Cabsiga Denbiga
- Sinaanta
- Gaadiidka

Waa maxay Adeegyada Hada Socda?

Adeegyo balaadhan oo ah nooc kasta caafimaadka iyo daryeelka bulshada, dhamaantoona laga bixiyo Wasaarada Caafimaadka Qaranka, Dowladaha Hoose, Waaxda Iskaa Wax-u Qabso iyo Waaxda Gaarka loo leeyahay oo lagu taageerayo caafimaadka iyo ladnaanta bulshada degaanka. Kuwaas oo ay ka mid yahiin.

Adeegyada Bulshada ee dowlada Hoose

- Adeegyada Dadka Waaweyn
- Adeegyada Caruurta

Adeegyada Degaanka ee Taageera Caafimaadka iyo Ladnaanta

- Guriyanta iyo Hoyla`aanta
- Fursadaha Shaqaaleeynta
- Waxbarashada iyo Taba-barada
- Adeegyada Dhalinyarada
- Adeegyada Caafimaadka Degaanka
- Adeegyada Madadaalada
- Gaadiidka / gaadiidka Bulshada

Adeegyada Bulshada ee Dowlada Hoose

- Adeegyada Dadka Waaweyn
- Adeegyada Caruurta

Adeegyada Waaxda Iskaa Wax-u Qabso

Waaxda Adeegyada Gaarka loo leyahay

Waa Maxay Khayraadka Diyaarka ahi?

Khayraadka Adeega Caafimaadka - Gudida Caafimaadka Degaanka Cardiff waxa Golaha Dowlada Welsh looga soo qoondeeyey 2004/5 waa £280.967m. Sida loo qarasheeyey waxa ay ku sharaxantahay jaantuuska hoose.

Khayraadka Adeega Caafimaadka (oo ah Milyan)



Cusbitaalka iyo Jaaliyada/Adeega	£187.637
Adeegyada La Ilaaliyo	£9.667
Adeega Daaweynta Guud	£33.612
Dawo Bixinta	£46.519
Dayeelka Kalkaaliyaha Bilaashka ah	£3.531

Gudida Caafimaadka Deegaanka ee Cardiff waxay biloowgii Hore ka dhaxashay nusqaan ah £9.988m Maamulkii Caafimaadka ee Bro Taf. Gudida Caafimaadka Degaanka oo wadajir ula shaqaynaysa Cardiff iyo Waadiga Wasaarada Caafimaadka Qaranka, ayaa sameeyey Istaraatiijiyada oo ay bedeleen iyo qorshe wax-qabad fiican leh oo lagu hubinaayo in ay Gudida Caafimaadka Degaanku ku soo noqdaan miisaan dhaqaale ilaa 2006, dib-u bixinta lacagta dilaaliinta ilaa 2009 (9.316m) iyo in Gudida Caafimaadka Degaanku dib-u bixiyaan qaybtooda amaahdii ay qaateen Maamulkii Caafimaadka ee Bro Taf ilaa 2009 (2.261m). waa in ay iyna hubiyaan in ay leeyahiin tabo kaafi ah oo ay ku dabooli karaan khataraha cusub ee iman kara mudada qorsheynta.

Maaliyada Daryeelka Bulshada - 2004/5 Golaha Cardiff wadarta miisaaniyadiisu waa £401m taasoo qiyaastii ilaa £79m loo qoondeeyey Daryeelka Bulshada ee Dadka Waaweyn iyo Caruurta. Isla Daryeelka Bulshada yaa curiyayaal badan kharashkooda laga maalgelinayaa deeqo gaar ah. Golaha ayaa awood sharci ah u haysta in ay iibiyaan adeegyada qaarkood. Natiijada dakhliga ka soo baxa ilahaa isugaynta wadarta guud ee kharashaynta miisaaniyada loogu-talo galay adeegyada Dadka Waaweyn iyo Caruurta oo ah 106m ayaa Lagu sharaxay jaantuuska hoos ku yaal.

Maaliyada Daryeelka Bulshada (waa £Malaayiin)



Addegyada sida tooska ah loo siiyo Dadka Waaweyn	£24.952
Fulinta Adeegyada Dadka Waaweyn	£45.325
Adeegyada Caruurta	£27.474
Maamulka Hawl-fulinta, Taageerada Taba-barada	£8.264

SIDA AANU UGU TALA-GALAY HORUMARINTA CAAFIMAADKA, DARYEELKA BULSHADA IYO LADNAANTA CARDIFF

Anagoo garoowsanayna in dhamaystirka Istaraatiijiyadu ay u baahan tahay in ay muujiso qorshayaasha loogu talo galay dhamaan kooxaha macmiisha ah, ayaa waxaa la isticmaalay la tashi xoogan iyo kulamo nidaamsan si qorshayaal loogu sameeyo dhamaan kooxaha macmiisha ah iyo adeegyada goobaha kala duwan. Wadnaha nidaamkan waxaa ahaa:

masnacyada **‘Hadal isu bedela ficil’ –** Siii dhisida masnacyadii ‘Dhiibo Odhaahdaada’, afar masnac oo kale ayaa la qabtay xiligii gu`gii 2004 Fiirada gaarka ah ee masnacyadaasi waxay ahaayeen muujinta xal u hel degaanka ah arimaha degaanka. Ujeedadu waxay ahayd si xooga loo saaro dib-u dhiska adeegyada hada jira oo lagu dhiiri geliyo iskaashi wada shaqayn ah iyo wadaagida khibradaha. Macluumaadkii ka qaybqaatayaashii adeega degaanku waxay wax-tar u noqotay qorshe dejinta adeegyada iyo soo dhexgelka macquulka ah oo la siiyey in ay ka fekeraan kooxaha talooyinka qorshaynta in ay tixgeliyaan. Sidan oo hubiyansa in shaqaalaha farnta hore iyo degenayaasha degaanku in ay wax-tar ka geysan karaan farsamaynta qorshayaasha.

Isku-daraka qorshaynya Qaab-dhismeedka – ka-bacdi isu soo uruurintii macluumaadkii masnacyada, ayaa kooxaha isku-darka qorshayntu si cad u cabireen qorshayaasha Istaraatiijiyada oo ku salaysan ahmiyadana siinaya:

- Cadaymaha baahiyaha
- Arimaha khuseeya ‘Go`aan’ ay sameeyeen sharci dejintu, qorshe qaran ama qorsheyaal deganku ka heshiiyey goor horena laga tashadey.
- Natiijooyinkii wada tashiga iyo nidaamadii kulanka.
- Aqoonta xirfad wanaagsan ku shaqaynta
- Dib-u hubinta qaynuunada Wanles ee Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada Wales

Caruurta iyo Dhalinyarada – Qaybtan Istaraatiijiyada waxaa lugu go`aamiyey mawqiifka Caruurta iyo Dhalinyarada ee qaabka guud shuraakada, taasoo tan Cardif ay ku dhisan tahay wajahaad wakaalado badan ku qorsheeyeen iyo maamulida barnaamijyo khaas ah oo ay ka mid yahiin, Biloowga la Hubo iyo maalgelinta shuraakada Caruurta iyo Dhalinyarada. Gudiyada qaynuunka ah iyo kuwa aan ahaynba waxay daacad u yahiin shuraakada qaabka guud ee siinaysa fiirada gaarka ah Istaraatiijiyada qorsheynta loogu talo galay Caruurta iyo Dhaliyarada, inkastoo hada la aqoonsan yahay qorsheynta muhiimka ah ee adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshadu dhinac socdaan nidaaminta qorshaynta ee qaabka guud. Soojeedinta layskudaray ee qorsheynta ay soo saareen shuraakadu oo ay la socoto shaqooyinka la xidhiidha qorsheynta adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada, oo ay kamid yahiin qorsheynta wax-qabadka degaanka ee Wanless. Qaabilaadan isku-darka ahi waxay ka humaag bixinaysaa soo jeedinta la xidhiidha shucuurta iyo caafimaadka maskaxda, taageerka qoyska iyo caruurta naafada ah/baahiyaha xadidan oo lagu sharaxay jaantuuska hoose.



Qiimeynta Raad-reebka Caafimaadka – Hirgelinta iyo dib-u hubinta Istaraatiijidan, dhamaan iskaashatada waxaa laga codsanayaa in ay isticmaalaan qalabka qiimaynta raad-reebka caafimaadka oo ku gargaaraya kobcinta wajahaada mudeysan ee hore loogu marinayo Istaraatiijiyada Caafimaadka, Daryeelka Bulashada iyo Ladnaanta. Qiimeynta Raad-reebka Sinaanta Jinsiyada oo qayb ka ahaa nidaamka kobcinta Istaraatiijiyada ayaa la dhameeyey. Tan ayaa si gaar ah loogu daabacay boga mareegta internetka ee isbahaysiga Caafimaadka Cardiff ee: **www.cardiffhealthalliance.org**

Wax ka Qabashada Xididada Caafimaad Darada

Istaraatiijiyada Jaaliyada Cardiff ayaa diyaarinaysa furaha ujeedada kor loogu qaadayo dhaqaalaha, dhowrida degaanka iyo ladnaanta bulshad magaalada: ujeedooyinkan waxaa lagu hagaajinayaa:

- Waxbarashada iyo taba-barada ilaa qofka noloshiisa ah
- Dhowrida Degaanka
- Jaaliyadaha, Guriyanta iyo Cadaalada Bulshada
- Ganacsiga iyo Gaadiidka
- Ciyaaraha Madadaalada iyo Dhaqanka

Wax ka Qabashada u Sinaan la`aanta Caafimaadka

U sinaan la`aanta Caafimaadka ayaa ka jirta gudaha iy dhexdooda degaanada Cardiff. Cardiff oo ah magaalo madaxda iyo goobta ugu naxaawiga weyn Wales, ayaa iyana leh bulshooyin isku ururan oo haysta baahiyaha khaaska ah ee la rafiiqa magaalooyinka waaweyn. Wax-qabad lagu abaarayo sinaan la`aanta degaanada/xaafadaha ayey fiiro gaar ah u yeelanayaan Kooxaha La Taliyayaasha Qorsheynta. Shaqadooda lagu sameeynayo hirgelinta qorshaha horumarinta ayaa hubinaya in xal ah degaanka loo helo arimaha degaanka oo dhinac socda hadafka iyo hiigsashada Istaraatiijiyada laga heshiiyey.

Jaaliyadaha haysta baahiyaha khaaska ah ayaa lagu heshiiyey in ay u yahiin Istaraatiijiyada furaha ugu muhiimsan ee arimaha Caafimaadka, Daryeelka Bulshada iyo Ladnaanta. Jaaliyadahan ayaa la cadeeeyey in ay yahiin madowga iyo jaaliyadaha laga badan yahay, dadka aan hoylaawayaasha, magan-gelyo doonka, midgaha iyo kuwa guur-guura iyo dadka qaba xanuunada HIV iyo AIDS ka. Qorsheyaal khaas ah oo la xidhiidha magan-gelyo-doonka, Midgaha iyo kuwa Guur-guura, hoylaawayaasha iyo dadka qaba xanuunada HIV iyo Aids ka ayaa lagu muujiyey qaybta hoose ee kooxaha macmiisha. Tixgelinta baahiyaha jaaliyadaha dadka madoow iyo jaaliyadaha laga badan yahay ayaa la soo marinayaa koox loo aasaasay isu-duwida dhamaan qorshayaasha khaaska ah ee loogu talo.

QORSHAYAASHA LAGU DABOOLAYO BAAHIYAHA DEGAANKA

Goobo badan oo u baahan kobcin kana jawaabaya baahiyaha degaanka ayaa la muujiyey marka la eego kooxaha macmiisha/adeegyada goobaha ee soosocda.

- Adeegyada Xanuunada Dareenka Kulul iyo Maamulida Cuduradad Dabada Dheeraad
- Caafimaadka Maskaxda
- Dadka Da`ada ah
- Caruurta iyo Dhalinyarada
- Naafada Jidhka iyo Dareenka
- Naafada Waxbarashada
- Daryeelayaasha
- Caafimaadka Xabsiga
- Sixun u Isticmaalka Maandooriyayaasha
- Hoylaawayaasha
- Magan-gelyo Doonka iyo Qaxoontiga
- Caafimaadka Galmada
- Midgaha iyo Kuwa Guur-guura

SOO KOOBIDA FAAHFAAHINTA QORSHAYAASHA

ADEEGYADA XANUUNADA DAREENKA KULUL IYO MAAMULIDA CUDURADA DABADA DHEERAADA

- Sameynta adeegyada jaaliyada oo xoogan, oo ay ka mid yahiin sameynta kal-kaaliye xirfad leh oo horkaca maamulida cudurada dabada dheeraada ee bulshada.
- Sameynta adeegyada daryeelka heerka dhexe si loo hubiyo in dadka xanuusanaya lagu daaweyo meesha ugu haboon ee wakhtiga saxda ah, sidanina ay ka qaado cadaadiska mugta adeega xanuunada dareenka kulul.
- Dib-u baadhida la xidhiidha Cardiff iyo Waadiga Adeega Caafimaadka Qaranka, Istaraatiijiyada Adeega Bukaan Baadhka ee 2004-05.
- Sameeynta qorshe lagu hirgelinayo horumarinta adeegyada qaliinka dhabarka lana keeno adeegyada qalabka cusub iyo kuwo casri ah oo loogu talo galay bukaan socodka.
- Sameeynta adeegyo iska xejinaya cudurada kansarka oo dhamaana dabooli kara heerarka cudurada kansarka ee dhamaan Wales.
- Sameeynta adeego xamili kara amaana ah oo loogu talo galay haweenka iyo caruurtooda.

CAAFIMAADKA MASKAXDA

Si sare loogu qaado wakhtiga dheer ee caafimaadka, daryeelka bulshada iyo ladnaanta ee dadka waaweyn ee haysta dhabaatooyinka caafimaadka maskaxda waa in:

- Si waanaagsan loo abaabulo caafimaadka maskaxda iyo xoojinta adeegya daryeelka u horeeya ee loogu talo galay dadka haysta dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda.
- Socodsiinta adeegyada kala duwan ee diyaarka ka ah heerka jihaynta daryeelka u horeeya.
- Kordhinta kala duwanaanta iyo tayada adeegyada ku salaysan bulshada lana hubiyo adeegyadu in ay daboolaan baahiyaha isticmaalayaasha iyo daryeelayaashoodaba.
- La hubiyo in la soo fara geliyo sida ugu horeeysa ee ugu macquulsan marka uu dhaco xanuunka caafimaadka maskaxda ee isticmaalayaasha adeega.
- La hubiyo in ay helaan wakhtiga saxda ah dadka u baahan daryeel cisbitaal ilaa iyo inta ay u baahan yahiin.
- Qalabka duuga ah ee cisbitaalada lagu bedelo kuwo casri ah.
- La hubiyo shacabka, waaxda iskaa wax-u qabso iyo kuwa gaarka loo leeyahay u wada shaqeeyaan wadajir isku mid ah marka ay bixinayaan adeegyada.

Ka hortaga, Kor-u Qadaadka caafimaadka, Mudnaanta iyo Adeegyada Jaaliyada

- In la Hirgeliyaa kor-u qaadida qorshaha wax-qabadka ee Caafimaadka Maskaxda.
- In loo Sameeyo Istaraatiijiyada jihaynta u horeeysa ee Daryeelka Adeega Caafimaadka Maskaxda.
- Si is dabajooga loo xidhiidhiyo wadashaqaynta jihaynta u horeeysa ee adeega daryeelka.
- In la Hirgeliyo qorshaha wax-qabadka Waxbarashada, Shaqaalaysiinta iyo Adeegyada Qorshaha Wax-qabadka Maalinlaha ah.

- In la kordhiyo isticmaalida ‘qaybsashada daryeelka’ ee adeega daryeelka u horeeya
- In la sameeyo qorshaha hore loogu marinaayo gargaarka loogu talo galay daryeelayaasha.

Xidhiidhka u horeeya, Qiimaynta iyo Ka Hortaga Dhibaatada

- Hirgelinta barnaamijyo waajaha daryeelka oo si buuxda u la xidhiidha Hagaha Golaha Dowlada Welsh.
- Sameeynta Koox ah ka Hortaga Dhibaatada iyo Adeegyo Isbahaysi ah
- Sameeynta adeegyo taageera guryaha laguna gargaaro Ka Hortaga Dhibaatooyinka.
- Sii fidinta Saacadaha Adeega oo Siyaado ah ee dhamaan Kooxaha Caafimaadka Maskaxda ee Jaaliyada.
- Dib-u sameynta maalinta wax-bixinta cisbataalka oo lagu bedelo daryeelka bukaan jiifka.
- Dib-u habaynta 6da kooxood ee hada ka jira Caafimaadka Maskaxda ee Jaaliyada oo laga dhigo 5 kooxood iyo aasaaska mid 4aad oo ah Kooxda Jaaliyada oo loogu talo galay Dadka Da`ada ah
- Ka sameeynta laba kooxood gudaha Adeega ka Hortaga Dhibaatooyinka

Adeegyada Xanuunda Dareenka Kulul ee Khaaska ah.

- Sameeynta Adeegyada Daryeelka wakhtiga dheer ee Jaaliyada iyo yaraynta isku halaynta hoyga cisbitaalka ee bukaan jiifka.
- Sameynta adeego degaanka ah oo loogu talo galay maareynta akhlaaqaha.

Furaha mudnaanaha kale oo ay ka midka yahiin:

- Dib-u hubaynta maalinta adeega daryeelka oo ahmiyada saara baxnaanint iyo dib-u dhex galka bulshada.
- Sameeynta Gudidida Isutaga Istaraatiijiyada loogu talo galay Adeegyada Caafimaadka Maskaxda.
- Sameeynta qorshe shaqo fulin loogu talo galay caafimaadka maskaxda.
- Qorshe dejinta khayraadka maaliyada taagan hada ee dhamaan adeegyada si ay ku war-geliso dib-u nidaaminta.
- Sameeynta qorshayaal loogu talo galay isku-darka miisaaniyada caafimaadka iyo dowlada hoose ee marxalada u horeeysa qaabilaada midaynta adeegyada.

DADKA DA`ADA AH

Guud ahaan

- In la hubiyo in la qaabilay baahiyaha Istaraatiijiyada caafimaadka iyo xanaaneynta Dadka Waaweyn ee Cardiff.
- In la hubiyo in ay dadka waaweyn diyaar u yahiin adeegyo dareensan dhaqankooda.

Abaabulida Caafimaadka iyo Ka Hortaga Caafimaad Darada iyo Dayactirka Dadka Waaweyn ee Jaaliyada

- Hirgelinta qorshaha wax-qabadka ee si wacan u gaboga loogu talo galay dadka da`ada ah.
- Sameynta Istaraatiijiyada ka hortaga kufida iyo daryeelka la xidhiidha wadooyinka.

- Sameeynta moodo baadhitaan ah oo lagu hiigsado kor-u qaadka caafimaadka dadka da`ada ah.
- Horumarinta isticmaalka cilmiga tegnolijiyada caawin kara guryaha la gargaaro.
- Sahaminta dhismaha guryaha ulajeedadoodu tahay wakhtiga dheer oo ay ka mid yahiin qorsheeynta guryaha daryeelka oo siyaado ah kalana duwan.
- Hirgelinta moodo kal-kaaliye caafimaad oo loogu talo galay dadka da`ada ah ee haysta dhowr xanuunada dabada dheeraada.
- Fidinta gargaar xooga saara daryeelka guriga lana bixiyo adeeg 24 saacadood ah.

Adeegyada Xanuunada Dareenka kulul iyo Dhibaatooyinka

- Sameeynt iyo hirgelinta ee Gudbinta Barnaamijyada Daryeelka Dib-u dhacay.
- Kobcinta qorshayaasha loogu hagaajinayo sida loola dhaqmo iyo sida loo daaweeyo dadka da`ada ah ee yaala cisbitaalka.
- Sameeynta nidaam la tashi ah dadka da`ada ee adeegyada bukaan jiifka.
- Dib-u hubinta kaalinta maalinta cisbitaalka ee taageerada maamulida kooxaha daaweynta.

Daryeelka Heerka Dhexe

- Meel isugu keenida adeegyada daryeelka dhexe ee kala duwan si loo balaadhiyo sii socodka daryeelka.
- Dib-u eegida heerka dhexe ee (degaanka ku dhow) iyo in la qoondeeyo qof walba adeega uu bixinayo.
- Fidinta adeegyada iyo horumarinta moodoyinka daryeelka heerka dhexe ee lagu soo jeediyey (hoy ku dhawowga) si loo hubiyo wax ka soo baxa daryeelka.
- Sameeynta nidaam maalgelin ah oo loogu talogalay maalgelinta wakhtiga dheer ee adeegyada daryeelka dhexe ee hada jira.

Daryeelka Wakhtiga-dheer

- In wadajir looga heshiiyo argti cad oo hore loogu marinayo daryeelka dadka da`ada ah.
- Qorshe dejinta wax-qabadka jaaliyadaha iyo waaxda iskaa wax-u qabso ee dadka da`ada ah iyo daryeelayaasha o lago qorsheeynayo awooda waaxdan.
- Adeeg bixiyaasha cusub in lagu dhiirigelyo ku soo biirka waaxda daryeelka guriga ee madaxabanaan si loo dejiyo awooda suuqa ee hada jira.
- Sahaminta iyo kar u qaadka wakhtiga dheer oo ah cutub daryeel kana baxsan rugta cisbitaalka oo loogu talo galay dadka da`ada ah ee jilicsan iyo dadka da`ada ah ee maskaxda ka xanuusanaya

CARUURTA IYO DHALINYARADA

Adeega Bulshada Caruurta oo Fulinya Istaraatiijiyada Mudnaanta

- Sameeynta koox waxtar leh oo ah qiimaynta iyo maamulida daryeelka.
- Sameeynta adeegyo kala duwan oo u gaar ah caawinta badbaadinta wax ka soobaxa wanaagsan.
- Kor u qaadida bad-baadada meelaha lagu hayo caruurta la ilaaliyo.

- Sameeynta wada shaqaynta ku dhow qiimeynta caafimaadka, qorsheeynta daryeelka, ka hor taga iyo dib-u hubinta loogu talo galay caruurta naafada ah iyo caruurta haysta baahiyaha khaaska ah ee caafimaadka,iyo horumarinta adeegyada diyaarka ah si loo daboolo baahiyaha caruurta iyo qoyskooda.
- Kordhinta awooda loogu talo galay taageerada iyo horumarinta adeega taageera madax- banaani ku noolaanshaha. Si lo hubiyo adeegyo wanaagsan oo kala duwan, kana mid yahiin fursadaha hoy siinta kuwa ka baxa daryeelka.
- In la helo maalgelin ku filan taageerada iyo kobcinta ka qayb qaadashada caruurta iyo qoysaskooda.
- Dhaqan gelinta iyo kor-u qaadida Istaraatiijiyada.

Intaa waxa raaca, kooxda Danbiilaha Dhalinyarada ayaa qaabilaaya dhor arimood oo ay ka mid yahiin.

- Dib-u baadhka qaab dhismeedkooda si loo hubiyo in ay daboolayaan u jeedadooda iyo in ay gaadhaan shardiyada gudida cadaalada dhalinyarada.
- Aasaasida gudi amar gudbin ah.
- Kordhinta la shaqaynta waalidka iyo dhibanayaasha.
- Kordhinta tirada digniinta kama danbeysta ah oo ay taageerayso ka hortagu.

Shuraakada Caruurta Cardiff – Mudnaanta Wax-qabadka

- Kor u qaadka xirfadaha degaanka iyo wax-qabadka hore ee shacuurta caafimaadka, kaas oo ka caawinaaya caruurta iyo dhalinyarada in ay ka badbaadaan ama ay yaraato saameynta dhibaatada caafimaadka maskaxda wakhtiyada noloshoodu kadeedan tahay.
- Horumarinta adeegyada khaaska ah ee degaanka looguna talo galay caafimaadka maskaxda ee caruurta iyo dhalinyarada si loo daboolo baahiyaha xadidan lana hirgeliyo adeeg cusub laga bilaabo Abriil 2005.
- In waalidka lala sameeyo Istaraatiijiyada qoyska taageerta iyo shuraakada qaynuunka, iyo waaxda iskaa wax-u qabso iyo kuwa gaarka loo leeyahay, ilaa oktoobar 2008
- Sameeynta Istaraatiijiyada loogu talo galay caruurta naafada ah iyo baahiyaha xadidan, ilaa Oktoobar 2008.
- In la cadeeyo khayraadka dadka iyo maaliyado kala duwan oo keena deeqda Istaraatiijiyada daryeelka caruurta ee degaanka.
- Sameeynta qorshe taba-bar sanadle ah oo loogu taagero shaqo gelinta waaxda daryeelka caruurta iyo horumarinta xirfadaha sii socda.
- Hirgelinta iyo horumarinta macluumaadka adeegyada.
- Tixgelinta baahiyaha caruurta ee adeegyada ku talo galka la soo mariyo beeraha iyo qalabka madadaalada.
- Adeegyada wax-siinta si loo hubiyo in dhamaan caruurta iyo dhalinyaradu ay awood u leeyahiin in ay heleen fursadaha ciyaaraha lagu raaxaysto oo aamaan ah.
- Muujinta taageerada la siinayo wax-qabadka adeega maktabada buugta ee Cardiff.
- Sameeynta Istaraatiijiyada sawir gacmeedka ee bulshada.
- Kordhinta wakhtiga fasaxa la yahay wax-qabadka loogu talo galay caruurta iyo dhalinyarada loona mariyo adeega dhalinyarada iyo shuraakada kale.
- Kor-u qaadka isticmaalida luqadaha Welsh ee arimaha la xidhiidh bulshada caruurta dhexdooda.
- Sameeynta dastuur iyo qorshe dejin ay ku wada shaqeeyaan dhamaan shuraakadu, laga bilaabo Abriil 2005
- Sameeynta Istaraatiijiyad kor loogu qaadayo qaabka guud.ee shuraakada caruurta iyo dhalinyarada kama danbaynta Oktoobar2005.

- Sameeynta hab-maamuus u dhaxeeya qaabka guud ee shuraakada caruurta iyo dhalinyarada iyo gudiyada ka dibada ah ee khuseeya, kama danbaynta Juunyo 2005.
- Dib-u hubinta sida ay u shaqeeynayso qaabka guud ee shuraakada kama danbaysta, Feebaraayo 2005 iyo in dabeeto laga dhigo sanadle waxana lagaga qabto natiijooyinka ka soo baxa.
- Sameeynta qaybaha kala duwan ee awooda siinaya barashada shuraakada iyo go`aan gaadhka ku salaysan cadaymaha ka yimi nidaamada qiimaynta, ilaa Oktoobar 2008.

Shuraakada Dhalinyarada Cardiff – Mudnaanta Wax-qabadka

- In la hubiyo in ay diyaar yahiin qaybaha kala duwan shaqaynta iyo taageerada si ay caruurtu iyo dhalinyarada uga qayb qaadan lahaayeen go`aan qaadashda.
- Sameeynta iyo hirgelinta Istaraatiijiyad degaanka ah oo sare u qaada sumcada iyo ka war haynta in dhalinyaradu leeyahiin gundhig xaquuq caalimi ah.
- Sameeynta qorshaha Istaraatiijiyada waxbarashada ee 14 ilaa 19 si hore loogu mariyo fursdaha dhalinyaradu ka helaan khibradaha bulshada iyo iskaa wax-u qabso.
- Sameeynta nidaamka isku xidhnaanta si loo yareeyo tirada dhalinyarada aan haysan waxbarsho, taba-bar shaqo.
- Sameeynta iyo hirgelinta nidaamka gundhiga xirfadaha loogu talo galay Cardiff lana soo mariyo CCET si gaar ahna u tixraaca baahiyaha dhalinyarada.
- Hagaajinta helida wax qabadka madadaalada wakhtiga iskuulka kabacdi looguna talogalay dhalinyarada kana mid yahiin helitaanka madadaalada, dhaqanka iyo raaxada.
- Daboolida baahiyaha laga cadeeyey goobaha caafimaadka iyadoo fiira gaar ah la saarayo talada caafimaadka galmada ee dhalinyarada.
- Sameeynt Istaraatiijiyada degaanka ah oo hore u mariya helitaanka macluumaadka iyo talada loogu talo galay dhalinyarada.
- Horumarin siyaado ah iyo hagaajinta qaaybaha kamidka ah u fidinta shekhsiga taageero iyo horumarinta ee dhalinyarada.
- Xaqiijinta, mudnaanta iyo hirgelinta wax-qabadka lagu qaabilaayo dareen wanaagsanaanta dhalinyarada.
- Sameeynta iyo hirgelinta qorsheyaasha wadaaga macluumaadka u dhaxeeya ururada la shaqeeya caruurta iyo dhalinyarada.
- Fidinta taba-barka wax-qabadka iskudarka ah si loo daboolo baahiyaha khaaska ah ee ay cadeysey shuraakadu.
- Qaadista xisaab hubin casriyasan ee baahiyaha sii loo muujiyo goobaha mudan wax-qabadka dhamaan shuraakada dhalinyarada.

NAAFADA JIDHKA IYO DAREENKA

Si kor loogu qaado Caafimaadka, daryeelka bulshada iyo ladnaanta wakhtiga dheer ee dadka naafada ka ah jidhka iyo dareenka laguna saleeyo:

- In la ilaaliyo dadka naafada ka ah jidhka ee jilicsan ama siyaalaha kale u dayacan.
- In taageerda wax-bixinta caafimaadka iyo daryeelku ayna kala go`o lahayn bilaashna tahay (oo ay ka mid yahiin waaxda iskaa wax-u qabso), guriyanta iyo adeegyada la xidhiidha.
- In la hubiyo in adeegyada ay dadku isku haleeyaan ay habaysan yahiin kana jawaabaan baahiyaha iyo in si adag loo maalgeliyey.
- In la tixgeliyo dhibaatooyinka gaadiidka, helitaanka, diyaarinta iyo degenaanta goobaha eeri go`anka ah ee Cardiff.

- In wax laga qabto takoorida ka dhanka ah dadka jidhka ka naafada ah.
- In kor loo qaado helitaanka waxbarashada ilaa inta la nool yahay iyo madadaalada wakhtiga firaaqada la yahay iyo fursadaha shaqooyinka.
- In kor loo qaado akhlaaqda wanaagsan iyo dhexgalka qaabilsan dadka jidhka ka naafada ah.

Kor u Qaadka Caafimaadka /Ka Hortaga

- Qorshe dejinta iyo cadaynta dal-daloolada ku jira adeegyada hada abaabula caafimaadka dadka jidhka ka naafada ah iyo dayactirka xaaladooda.
- Baadhid lagu sameeyo fursadaha hore loogu marinayo olalaha degaanka iyo ku xidhiidhinta ololayaasha qaranka ee kor loogu qaadayo siyaabaha waangsan ee loola dhaqmo dadka naafada ah.
- Sameeynta adeegyo siyaado ah oo loogu talo galay daryeelayaasha oo kala duwan lana bed-bedeli karo.
- Kordhinta fursadaha tababarka shaqaalaha si loo hubsado in la aqoonsado baahida haysa dadka ka naafadaka ah jidhka iyo dareenka.

Deganaata Madaxbanaan

- Dhamaystirka dib-u baadhida adeega isu geynta kal-kaaliyah/qalabka iyo kor u qaadida hirgelinteed.
- Ka qaybqaadashada Istaraatijiyada horumarinta gaadhiga yar ee naafada lagu riixo oo ay hogaaminayaan Gudida Caafimaadka ee Wales.
- La shaqaynta ururada guriyanta sidii loo dhisi lahaa guryo cusub lana hubiyo in ay helikaraan dadka naafada ka ah jidhka , oo ay qaybtooda ka qaataan OT si loo hubiyo in guryaha la bedeley ay haystaan qalabka ku haboon.
- Sameeynta moodo dib loogu hirgeliyo adeegyada wax-bixinta loogu talo galay dadka da`adoodu ka hoosayso 65 si loogu xisaabtamo hawlgalka meelaha kale iyo in siyaalo kale loo heli karo adeegyada inta ayna dhibooto iman.
- Sameeynta qorshayaal lagu fidinayo awooda qorshayaasha dib loo hirgelinayo si loo qaabilo baahiyaha dadka da`adoodu ka yartahay 65 jir.
- In hada baadhitaan lagu sameeyo cadeymaha lagu hagaajin karo helitaanka jihaynta u horeeysa ee adeegyada jaaliyada, kana hortaga cisbitaal gelista.
- Muujinta awooda lagu kordhinayo ee looga baahan yahay dib-u bilaabida iyo balaadhinta qorshaha hada socda ee bixinta dakhliga tooska ah.
- Tiro koobida loogu talogalay dalbashada “adeegyada dayactirka”, baadhida shaqo qabadka wanaagsan iyo sameeynta qorshayaal fidinaya adeegyada iskaa wax-u qabso
- Sameeynta qorshe saldhigiisu yahay bulshada oo ah kooxda ka hortaga dhibaatada.
- Doonashada ra`ayiga dadka naafada ah ee ku saabsan helitaanka adeegyada bulshada Cardiff.
- La shaqaynta ururada iskaa wax-u qabso si loo siiyo adeegyo dheeraad ah oo khaas u ah dadka dareen la`aantoodu lamaan yahiin si baahidooda loo daboolo.
- In la sameeyo in si joogto ah loo wada shaqeeyo si loo bixiyo taageerada guryaha ee ugu haboon.

Daryeelka Sii Socada/Heerka Dhexe

- Xaqiijinta ujeedada qalabka daryeel maalmeedka iyo cadaynta fursado dheeraad ah oo is bed-bedela ee adeega wax-bixinta.
- Fidinta xidhiidhinta waxbarashada madadaalada wakhtiga firaaqada la yahay iyo wakaaladaha shaqaaleeynta si loo cadeeyo maadooyin kale oo lagu bedeli karo “daryeel maalmeedka”.
- Horumarinta qorshayaasha socda ee wakaaladaha si loo hubiyo in adeegyadu dhakhso u jawaabaan.

Sii Socodsiinta Degaanka iyo Kal-kaaliyaasha Daryeelka ee Mudada Dheer

- Ka faa`iidaysiga shaqada sii socota si loo dhiiri geliyo si lagu hubiyo in suuqu sameeyo adeegyo lagu daboolo dhibaatooyinka degaanka.
- Qiimaynta waxtarka ay yeelanayso hadii daaweynta dabiiciga ah la siiyo guryaha xanaaneynta, qiyaasta baahiyaha, baadhista shaqo qabadka wanaagsan iyo soo jeedinta qorshayaal.

KA DACIIFSANAANTA WAXBARASHADA

Kor u qaadka mudada dheer ee waxbarashada ee caafimaadka, ladnaanta iyo bulsho ku soo darida ee dadka daciifka ka ah waxbarashada laguna saleeyo:

- Hirgelinta Midaynta nidaamka Qiimeynta ee adeegyada la siiyo dadka daciifka ka ah waxbarashada.
- Sameeynta nidaam cusub oo wado shaqayn ah loona maro golaha dadka ka daciifka ah waxbarashada.
- Ilaalinta daryeelka dadka ka daciifka ka ah waxbarashada ee dayacan.
- Kor u qaadida heerka daryeelka iyo taageerada la siiyo dadka ka daciifka ah waxbarashada.
- Ku taageerida dadku in ku noolaadaan guryahooda iyo bulshadooda, si sare loogu qaado madaxbanaanida iyo kamid noqoshada bulshada.
- Guul ka gaadhida kala go`o la`aanta iyo bilaash ahaanta adeega taageerada ee dhamaan adeeg bixiyaasha.
- In la hubiyo in adeegyada la siiyo dadka ka daciifka ah waxbarashada oo ay ka daboosho baahidooda shakhsiyaadka ah.
- Ilaalinta iyo kor u qaadida caafimaadka ee dadka daciifka ka ah waxbarashada.
- La dagaalanka takoorida iyo kor u qaadida sawirka wanaagsan ee dadka ka daciifka ah waxbarashada.
- Si macno leh u ogolaanshaha doodaha iyo go`aamada daryeelkooda dadka ka daciifka ah waxbarashada.
- In la hubiyo in macluumaadka loogu talogalay isticmaalayaasha iyo daryeelayaasha uu yahay luqad iyo qaab uu helikaro shikhsigu.
- In la hubiyo in dadka ka daciifka ka ah waxbarashada ay si buuxda u helaan macluumaadka ku saabsan xaquuqdooda, kala doorashada, taageerada diyaarka ah iyo adeegyada iyo manfaca.

Kor u Qaadka Caafimaadka/Ka Hortaga

- La sameeynta adeeg isticmaalayaasha fursado wax-tar leh oo loogu talogalay si ay dadka ka daciifka ka ah waxbarashada u qaatan nolol caafimaad leh.
- Dib-u eegida baahiyah daryeelayaasha oo ay kamid yahiin taariikhda qofka noloshiisa, la shaqaynta “Kooxda Qorsheynta La Taliyaasha”
- Hirgelinta talooyinka dib-u eegida daryeelka nefiska.

Degenaanshaha Madaxabanaan

- Kordhinta kala doorashada guryaha ee dadka haysta hab-u dhaqnka ama hawsha xadidan una baahan guryaha marba mid loo guuro.
- La shaqaynta dhamaan qaybaha iyo goobaha isku daray hantida guryaha si loo hubiyo in dhaqaalahoodu iyo isticmaalida wanaagsan ee dadka da`ada ah ee ka daciifka ka ah waxbarashada ku xisaabtamaan awood daraanta jidhkooda, iyo dhalinyarada oo ay ku xisaabtamaa ra`ajadooda isbedelaysa ka madax banaanaanta guriga qoyskooda.
- Dib-u eegida iyo ka jawaabida horumarinata Istaraatiijiyada si loo hubiyo qorshahani lugta uu ku yeelanaayo dadka ka daciifka ah waxbarashada in laga fekeray.
- Soo ban-dhigida nidaam loogu taageerayo kuwa buuxiyey heerka qorshaha dakhliga tooska ah in loo ogolaado in ay maamulaan cida bixinaysa daryeelkooda.
- Dhamaystirka dib-u baadhis madaxbanaan ee adeegyada u-doodka iyo cadaynta qorshayaal lagu hubinayo helitaanka adeegyada ugu haboon.

Daryeelka Heerka Dhexe/ ee Sii Scoda

- Dhamaystirka Istaraatiijiyada dib-u baadhida ee daryeelka maalinta iyo cadeeynta hadafka/soo jeedinta ee fursadaha shaqaalaaysiinta, madadaalada, waxbarashada,nefiska iyo daaweeynta dabiiciga ah.
- In la qaado muuqaalka sawirka baahiyaha iyo isticmaalida hantida wakhtigan, iyo muujinta adeeg bixinta mustaqbalaka ee daryeelka sii socda.

Daryeelka wakhtiga dheer/ Sii Socda

- Dib-u baadhista wax-bixinta khaaska ah ee hada jira iyo iyadoo laga faa`iidaysanayo shaqada socota si loo dhiiri geliyo in suuqu sameeyo adeegyo degaanka ah oo daboola baaahiyaha degaanka.
- Sameeynta adeegyo awood u leh soo celinta dadka sida aan haboonayn loo dejiyey degaanka dibadiisa.

Heerarka Daryeelka

- Horumarinta daryeelka sii socda oo ay sameeyaan adeeg bixiyaashu siina mariyaan qorshayaasha hantida dadka ee kala duwan.
- Aasaasida shaqo ah kal-kaaliye la taliye oo sahla waxbarashada iyo fududaynta arimaha waxbarashada naafada oo ka dhaxeeya shaqaalaha daryeelka xanuunada dareenka kulul/ka labaad/ka u horeeya
- Kordhinta fursdaha taba-barada khaasatan kuwa loogu talo galay shaqaalaha daryeelka caafimaadka xanuunada isku midka ah iyo shaqaalaha meelaha lagu madadaasho wakhtiga firaaqada la yahay, si loo hubiyo in baahiyaha dadka ka daciifka ah waxbarashada la aqoonsaday.

DARYEELAYAASHA

Waxaa laga soo qaatay Qorshaha Daryeelayaasha ee Cardiff, ujeedada Istaraatiijiyadu waa in:

- Kor u Qaadida iyo Ilaalinta caafimaadka ee daryeelayaasha iyo in la sugo in baahiyahooda la aqoon saday laguna talo galey.
- La sugay in ay diyaar yahiin taageerooyin badan oo kala duwan si ay u sii wadaan daryeelka taaso si adag loo maal geliyo.
- Si sahlan loo heli karo macluumaad sax ah lana xidhiidha luqadaha kala duwan iyo qaababkooda si lo daboolo baaahiyaha shakhsiga.
- La hubiyo in ay aqoonsan yahiin daryeelayaashu iyo dadka khidmada ku shaqeeya shaqada daryeelaha.
- Daryeelayaasha lagu taageero taba-bar iyo talo si ay u daryeelaan qofka la ilaalinaayo iyo in la cadeeyo sarena loo qaado xirfadaha iyo khibrada iyo taageerada daryeelayaasha.
- Daryeelayaasha laga taageero si ay shaqadooda u joogaan amaana u ahaato iyadoo loo marayo adeegyada ku haboon iyo qorshayaasha ugu wanaagsan daryeelka.
- Ay si joogta ah daryeelayaashu uga qayb qaataan qorshaynta iyo keenista adeegyada iyagoo leh door isku mid ah.
- La hubiyo in ay wado shaqayni ka dhaxayso qaynuunka, iskaa wax-u qabso iyo waaxda gaarka loo leeyahay.
- La hubiyo helitaanka adeega iyo taageerada loogu talogalay daryeelayaasha kii uu doono ha ahaado jinsiga, jinsiyada, naafo, da`ada iyo lab ama dhedig.

CAAFIMAADKA XABSIGA

Hiigsashada Dariiqada xabsiga ayaa dhigaysa Istaraatiijiyad cad cad oo ay kula shaqeeynayaan xabsiyada Cardiff kuwa kale oo horumarinaya wanaajinta adeegyada caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka ee maxaabiista iyagoo u maraya:

- Dejinta baahiyaha caafimaadka ee xabsiga Cardiff.
- Dejinta istaraatiijiyada lagu horumarinayo qaababka kala duwan ee qorshaynta iyo hubinta wada shaqaynta gudaha iyo dibada ee xabsiga Cardiff.
- Dejinta sameeynta istaraatiijiyada adeega daaweynta oo ay la kaashanayaan khayraadka sugan.
- Wax-siinta qaabka guud oo bixinaya balanqaado wadajir ah oo laga soo qaaday xabsiga Cardiff iyo adeega wasaarada caafimaadka qaranka, dowlada hoose iyo ururada iskaa wax-u qabso.
- Tabarrucida lagu daboolayo caafimaadka ee dhamaan bartilmaameedka Wales.
- Wax-siinta qaabka guud ee aasaaska heshiisyada wakhtiga dheer ee lala galay bixiyayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada.

Xabsiga ayaa cadeeynaya talooyinka soo socda in hore loo qaato si loogu daboolo baahiyaha bulshada, oo laysugu geeyey 10 fure ciwaankan hoose:

- Maamulida Macluumaadka iyo Teknoloojiyada (IM&T) ee taageerida nidaamka.
- Kaadi Macaanka iyo Cudurka Wadnaha ee Dabadadheer.
- Ka Diiwaangalka Dhakhtarka Xaafada.

- Daawo Qorida.
- Si Xun u Isticmaalka Walxaha Maandooriyaha.
- Caafimaadka Xanuunka Maskaxda.
- Adeegyada Ilkaha.
- Xakamaynta Jeermiska Cudarada Dhaliya.
- Qaabka Nolosha.
- Shaqada guud – Horumarinta Fulinta.
- Shaqada Guud – Maamulida Fulinta Arimaha.

SI XUN U ISTICMAALKA MAANDOORIYAHA

Sameeynta qaabka guud ee daaweynta sixun u isticmaalida walxaha maandooriyayaasha taasoo Golaha Dowlda Welsh go`aamiyaan inta badan shaqooyinka hawlgalaka degaanka, iyo hirgelinta qorshaha daryeelka danbe ee gobolka oo hada la dhisayo.

Golaha Dowlada Welsh ayaa aad u danaynaysa in ay shuraakadu hubiyaan in talooyinkii Gudida Talada ee soo tebintii sixun u isticmaalida walxaha maandooriyayaasha ee "Waxyeelada Qarsoon, Ka Jawaabida Baahiyaha Caruurta ee Dhibaatooyinka Isticmaalida Maandooriyayaasha" dib-u baadhis lagu sameeyo qorshe waxqabadna loo sameeyo sida ugu haboon.

Wax-qabad kale oo balaadhan oo ay hore u dhaqaajinayso WAG hana Qaabka Guud ee Maamulida Fulinta dhamaan Wales oo ay ka midyahiin macluumaad loo diyaariyey burqada dhexe iyo qaamuus qeexan.

WAG ayaa iyana ka fulinaysa dhamaan Wales taba-baro baadha baahiyaha la xidhiidha soo ban-dhiga maandooriyaha iyo Heerarka Xirfadaha Khamriga Qaranka ee Wales.

Waxa kale oo aanu sugaynaa daabacadaa "Sameeynta Hagayaasha Wax ka Ogaanta Qarsoodiga ah ee Dhimashada la Xidhiidha Maandooriyaha" ee WAG.

Qorshaynta Wakhtiga

Jadwalka la xidhiidha Sameynta Qorshaha Wax-qabadka ee Sixun u Isticmaalida Walxaha Maandooriyaha ee 2005 ilaa 2008 waa kan sooo socda.

Mudada Oktoobar 2004 - CSP waa in ay ogolaato mudnaanta loogu talo galay 2005 ilaa 2008. waxaanu ku talinaynaa in ay aad ula tashadaan La Taliyaha Gobolka marka hore iyo marka danbeba.
Kama danbaynta 29 Nofembar – Kooxda La Taliyayaasha Gobalka ee Sixun u Istimaalka Maandooriyaha ay qoraaladoodu dhamaad u dhawow u yahiin .
Kama danbaysta 10 Janaayo – CSP ayaa helaya jawaab celinta ka timi La Taliyayaasha ee loo gudbiyey 29 Nofembar.
kama danbaysta 12 Feebaraayo 2005 – Golaha Dowlada Welsh oo la soo gaadhsiiyo kaabista iyo wax-kabadalkii ugu danbeeyey waxa qoran.
Kama danbaysta Maarso 2005 – Golaha Dowlada Welsh oo ka heshiiya qorshaha ay ku adeecayso hagaha qaynuunada iyo wargelinta sida ugu haboon.
Kama danbaynta 31 Maarso 2005 – Si rasmi ah u qaadashada nidaamada CSP ay qorshaysay kuwaas oo sida ugu macquulsan ee mudadaas ka dib loogu diyaariyo dadweynaha.

HOYLAAWAYAASHA

Istaraatiijiyada Hoylaawayaasha ee Cardiff ayaa koox koox u dhigay wax-qabadkooda oo hoosyimaada sadex ciwaan oo ah ka hortaga, guriyanta iyo taageerada.

Ka hortaga

- Si loo hubiyo sababha keena hoyla`aanta waa in dabagal dheeraad ah lagu sameeyaa laguna soo daraa wakaaladaha kale ee aan hada lugta ku lahayn qaababka caadiga ah ee loo uruuriyo tiro koobka.
- Balaadhinta isticmaalida iyo ka koobnaanta tilmamaha Streetwise+ oo ay ka mid noqoto macluumaad khaas ah oo loogu talogaly haweenka iyo dhalinyarada, talo siinta maxaabiista, kuwa ka baxay ciidamada qaranka iyo dadka laga soo saaray cisbitaalada iwm oo uu la socdo waxii la xidhiidha nidaamka tilmaamaha hagayaasha.
- In la qaado baadhis xeel dheer oo ah sababaha looga saaray wax-qabadka badbaadinta dhamaan guryaha kala nooca ah ee kiraystayaasha la hubo.
- In la sameeyo qalabka ka hortag ah oo hore loogu marinayo qorshaha kownsalka ee `baayaca kharashgareynta`.

Guriyanta

- In la sameeyo midayn buuxda iyo nidaamka dib-u dejinta oo ka yimaada guryaha la taageero ilaa dhamaan kiraystayaasha sugan ee kala duwan.
- In la baabi`iyo baahiyaha loo qabo isticmaalida hudheelada loo yaqaano sariir iyo quraac iyo meel dejinta degaanka ka baxsan.
- In horeloomariyo tayada helitaanka hudheelada jiida hore iyo ka heshiinta qorshayaasha lagu dhimayo baahiyaha dibad seexadka iyo ka reebida.

Taageerada

- In la sameeyo Goobta Qiimaynta oo ah goobta dhexe ee lagu bixiyo qiimeeyta heerka mudnaanta baahiyaha iyo fidinta talada diyaarka ah iyo taageerada lagu daboolayo baahiyaha hoyla`aanta qofka kelida ah.
- In la hubiyo balanqaadka joogtada oo ah koox u go`ay qadiyada caafimaadka iyo adeegyada kale ee taageerada qaynuunada oo lagu daboolayo baahiyaha khaaska ah ee dadka hoylaawayaasha ahi ku heli karaan guriyanta la taageero ama kuwa dibada seexda.
- In la taageero kuwa ku jira guryaha gaarka loo leeyahay si loo yareeyo hoyla`aanta iyo in la taageero kuwa doonaya in ay galaan guryaha gaarka loo leeyahay.

MAGAN-GELYO DOONKA IYO QAXOONTIGA

Si sare loogu qaado caafimaadka iyo ladnanta magan-gelyo doonka la keenay Cardiff iyo qaxoontiga doortay in ay joogaan Cardiff, waa in la siiyo adeegyo kala duwan oo ay ka midyahiin.

- In taageero lagu siiyo guriyanta iyo mudada kiradu socoto
- In magan-gelyo doonka laga caawiyo daryeelka bulshada si ay u helaan adeegyada guud oo ay ka mid yahiin adeega sharciga hadii loo baahdo.

- Xal u helida dhacdooyinka khaaska ah ee kadeedida/cagajugleynta/xiisadaha kulul ee jaaliyada.
- Habaynta taageerada luqadaha.
- Helitaaka iskuulada degaanka.
- Dhisida fursadaha waxbarashada ee dadka waaweyn.
- Bixinta adeega u horeeya ee daryeelka caafimaadka iyo helida muhiimada labaad ee daryeelka caafimaadka sida ugu haboon.

Soo jeedinta sameeynta himilooyinka dusha ku xusan waxaa si weyn loogu halaynayaa hadii heshiiska NASS ee loogu talogalay magan-gelyo doonka la keenay Cardiff dib loo cusboonaysiiyo 2006. marka go`aankan la gaadho waxaa loo baahan yahay in dib-u baadhis lagu sameeyo hab socodka adeegyada hada socda iyo Istaraatiijiyada nidaamka qorshaha loogu talo galay heshiiska mudada danbe. Qorshayaasha lagu qaabilaayo dal-daloolaka hada ku jira adegyada la siiyo kooxaha macmiisha ah waxaa ka mid ah:

- In la aasaaso koox isku xidhan oo qorsheeya nidaamka loogu talogalay magan-gelyo doonka.
- In la cabiro baahiyaha mustaqbalka ee magan-gelyo doonka iyo qaxoontiga iyadoo taasu ay ku xidhan tahay go`aanka la xidhiidha heshiiska soo dejinta danbe.
- Si cad in loo qeexo nidaamka lagu daboolayo baahiyaha caafimaadka iyo ladnaanta magan-gelyo doonka iyo qaxoontiga.
- Ku tabarrucida horumarinta luqadaha iyo xidhiidhka Istaraatiijiyada.
- Sameeynta nidaamyo kor loogu qaadayo kordhinta saacada shaqooyinka wakhtiga gaabana ee taageera magan-gelyo doonka iyo qaxoontiga iyagoo la shaqaynaya Kooxda Jihaynta Caafimaadka Maskaxda.
- Sameeynta qorshayaal lagu balaadhinayo adeegyada ESOL oo shuraako la ah Adeega Waxbarashada Inta la Noolyahay ee Kownsalka iyo waaxda iskaa wax-u qabso.
- Sameeynta qorshayaal loogu talo galay muujinta iyo keenista adeegyada xirfadaha daruuriga ah oo shuraako la ah Adeega Waxbarashada Inta la Noolyahay ee Kownsalka iyo Waaxda Iskaa Wax-u Qabso.

CAAFIMAADKA GALMADDA

In la mideeyo Adeegyada Caafimaadka Galmada Degaanka kuwaas oo ku guulaysta hiigsashada soosocda.

- In hoos loo dhigo saamiga hablaha uurka qaada ee Cardiff.
- In hoos loo dhigo dhacdooyinka iyo baahsanaanta gudbinta jeermiska cudurada galmada.
- In la hubiyo in ay dadku helaan talada iyo adeega caafimaadka galmada oo tayo leh.
- In la hubiyo in ay dhamaan dhalinyarada Cardiff helaan adeegyada iyo talooyinka caafimaadka galmada oo tayo leh.
- In la keeno adeegyada soo mara wakaaladaha qaynuunka ah iyo iskaa wax-u qabso.

Waxaa lagu talo galay in hiigsashadan lagu gaadho:

- Xoojinta wax-bixinta bartilmaameedkeedu yahay waxbarashada iyo barnaamijyada ka hortaga loona maro isgaadhsiinta dibada.

- Cadaynta wax-qabadka iyo midaynta bixinta adeegyada caafimaadka galmada ee hada la soo mariyo Daaweynta Xubnaha Dhalmada, Qorsheynta Dhalmada Qoyska iyo Jihaynta Goobaha Daryeelka.
- Bixinta adeega khaaska ah ee Cudurada Galmada ee Gudba iyo Adeegyada Caafimaadka Galmada ee CRI in lagu kordhiyo baadhida iyo daaweynta, dhameynta daaweynta iyo sawirida jidhka; in ay shaqada shuraakadu bixiyaan baadhida dibad jooga ee loogu talogalay bartilmaameedka kooxaha gaarka ah; shaqooyinkaas waa in la hubiyo in si sinaan ah loo helo.
- Waa in adeegyo khaas ah laga bixiyaa Cisbitaalka Jaamacada Wales oo ay ka mid yahiin adeegyada khaaska ah ee HIV, taasoo lagu hubinayo in moodada mustaqbalka ee daryeelka HIV uu ka jawaabi karo dalbashada mustaqbalka.

Goobaha khaaska ah ee saldhiga u noqonaya dhidibtaaga arimaha dusha ku xusan waa:

Istaarijiyada Qorshaynta

- Xoojinta doorka APG oo metela golaha istaraatiijiyada shuraakada si ay dusha ugla socdaan hirgelinta 3 geeska ah ee midaynta adeega caafimaadka galmada Cardiff.
- In la hubiyo in shaqooyinka PG iyo kuwa CYPPF ee arimaha naxaawiga caafimaadka galmada ay joogto yahiin.
- In lagu xisaabtamo dib-u eegida adeegyada haweenka ee hirgelinta dariiqada daryeelka ee loogu talogalay caafimaadka galmada.

U Sinaaanta Helitaanka

- Samaynta qorshayaal lagu horumarinayo war-ka haynta adeegyada iyo sida loo helayo lana sii maro kordhinta waxbarashada /taba-barada ee ku jira mowqiifka hirgelinta adeegyada moodooyinka cusub.
- Sameynta qorsheyaasha shaqada bar-tilmaameedka oo lagu horumarinayo helitaanka adeegyada caafimaadka galmada ee loogu talogalay kooxaha BME iyo Raga Raga u taga.

Midaynta Adeegyada Wax-bixinta

- In la qaato sameeynta Istaarijiyada lagu qaabilaayo hore-u qaadka heerka 1 ee wax-bixinta oo ay kamid yahiin qorsheynta iyo amniga wax-bixinta wakhtigan/khayraadka.
- Sameynta qorshe wax-qabad oo lagu taageerayo hirgelinta adeega heerka 2.

Daryeelayaasha

- Dib-u baadhida shaqooyinka hada la qaado ee la xidhiidha daryeelayaasha dadka qaba xanuunada HIV/AIDS ka iyo muujinta qorshayaasha lagu xidhiidhsiinayo shaqooyinkan iyo qorshayaasha adeegyada guud ee loogu talogalay daryeelayaasha.

Dhaliyarada

- Taageerida samaynta istaaga koobaad ee khanka macluumaadka lagala baxo ee iskuulada sare.
- Taageerida bixinta macluumaadka caafimaadka.
- Sii dhiska siyaadada ah ee wax-bixinta adeegyada caafimaadka galmada ee goobaha dhaliyarada iyo jaaliyadaha oo qaata qaabilaad kala weji duwan.

- Adkaynta iyo qaabka fidinta qaybinta salbatiibooyinka iyadoo lagu shaqaynayo shuraako, lana isticmaalayo shaqaale taba-bar khaas ah leh, lana abaaro goobaha aan awooda lahayn, dhalinyarada ku jira nidaamka ilaalinta iyo dhaliyarada iskuulada laga eryey.
- Sameeynta iyo keenista wakaalado badan oo ah taba-barada galmada caafimaadka iyo wax-qabadka hore ee qaabilsan xirfadaha nolosha iyo arimaha kala wajiga duwan.
- Sameeynta khaaska ah ee kor u qaadka wax-qabadka caafimaadka galmada oo ay ka midyahiin kalkaaliyaha caafimaadka iskuulada.
- Hirgelinta shaqada guud ee qorshaynta wadajirka ah iyo dhisida habmaamuuska oo lala sameeyo qaynuunka iyo waaxda iskaa wax-u qabso.
- Taageerida wax-bixinta iskuulada ee galmada iyo rafiiq ahaanta.

MIDGAHA IYO KUWA GUUR-GUURA

In kastoo aanu ilaa hada jirin golaha qorshaha iskudarka ee loogu talogalay kooxdan ayaa waxa la soojeediyey koox gasha dhameysana waajibkan, warkana u tebisa kooxda iskudarka fulinta si loo aasaaso sameynta wadajirka fulinta istaariijiya ee loogu talogalay kooxdan. Ra`ayigii ka soo baxay aqoon isweydaarsigii la qabtay Marso 2004 ee Midgaha iyo Kuwa Guur-Guura ayaa saldhig u noqonaya shaqadan, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen:

- Aasaasida jago shaqo u leh xirfad khaas ah hagaajinta isku xidhnaanta iyo isu duwida adeegyada.
- Aasaasida meel lagu daaweeyo ladnaanta qofka.
- Sare u qaadka iyo wax soosaarka musawirka caafimaadka/macluumaadka.
- Sameeynta qalab loogu talogalay xaaladaha bulshada oo ay wax ku darsato waxbarashadu.
- Qaabilaada arimaha degaanka ee goobaha Kaawnsalka iyo caafimaadka iyo amniga.
- Dhisida awooda jaaliyada.

TALAABADA XIGTA

Istaraatiijiyada Caafimaadka, Daryeelka Bulshada iyo Ladnaanta ee Cardiff waxay noqonaysaa dokumaanti nool oo leh kaaf wakhtiga dheer isbedbedla lana qabsada. Sidaas darted sameeyskiisu waa talaabada u horeeysa ee socodka lagu horumarinayo caafimaadka iyo ladnaanta dadka Cardiff. Shaqo badan ayaa loo baahan yahay si ay aragtida Istaraatiijiyadu run u noqoto.

Si ay sidani u dhacdo,tiro is daba jooga oo ah furayaasha nidaamkan ayaa la dejinayaa kuwaas oo taageeraya kuwan soo socda:

- Si fiican u adeegsiga istaraatiijiyada caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee jaaliyada Cardiff oo bixinaaya shaqada guud ee istaraatiijiyada lagu dhisayo caafimaadka iyo daryeelka bulshada Cardiff 3da sano ee soosocda.
- Sii dhisida siyaadada ah ee qorshe soojeedinta oo waxqabadkooduna faah-faahsan yahau kuna jiro hiigsasho cad.
- Midaynta Istaraatiijiyada lagana dhigo lafdhabarka shaqooyinka Gudida Caafimaadka Degaanka iyo Kawnsolka.
- Sii xoojinta nidaamka qorsheynta ee iskudarka Cardiff.
- Si fiican u adeegsiga fursadah isbedbedelka ay bixisay Sharciga Caafimaadka 1999.

Qorshaha lagu sameeynayo Istaraatiijiyada 2008 ilaa 13 waxaa loo baahan yahay in la bilaabo horaanta 2006.

Qorshaha Baadhitaanka iyo Dib-u Hubinta

Iyadoo qayb ka aha Istaraatiijiyada Jaaliyada Cardiff , Istaraatiijiyada Daryeelka Caafimaadka Bulshada iyo Ladnaanta gebi ahaanteedba waxaa fiiro gaar ah u yeelanaya Isbahaysiga Caafimaadka Cardiff oo metelaya Kooxda Hirgelinta Istaraatiijiyada Jaaliyada. Isbahaysiga Caafimaadka Cardiff oo ah madaxa u sareeya ee iskudarka qorshe dejinta, waxuu war bixin cusub oo joogto ah ka heli doonaa horusocodka Istaraatiijiyada, iyana waxay dhinaca kale war bixin siinayaan Kooxda Hirgelinta Istaraatiijiyada Jaaliyada.

Kooxda La Taliyaasha qorsheynta ayaa masuul ka ah midwalba gaar kiisa baadhida xeesha dheer iyo qorsheyaasha dib-u hubinta iyo dib-u baadhida nidaamka shuraakadu ku keenayso Istaraatiijiyada qaybtooda iyo saameynta iyo natiijada ka soo baxda Istaraatiijiyada laftigeeda ee la xidhiidha kooxaha macmiisha ah. Iskudarka Kooxaha Fulinta waxay baadhidoonaan arimaha guud iyo dhex marka mawduucyada ay kamidka yahiin kor-u qaadka caafimaadka.

La xisaabtanka guud ee hirgelinta Istaraatiijiyada iyo maamulida maaliyadu waa masuuliyada shuraakada qaynuunka, Gudida Caafimaadka Degaanka Cardiff iyo Kownsalka Gobolka Cardiff, marka la aqbilona waxaa lagu wargelinyaa urur kasta nidaamkiisa dowladeed. Gudida Caafimaadka Degaanka iyo Kownsalka Cardiff ayaa raadinaaya sahanka iskudarka miisaaniyada iyo nimaadka fulinta wadajirka ahee hoos yimaada sharciga isbedbedla ee Wasaarada Caafimaadka Qaranka.

Isbahaysiga Caafimaadka ayaa si tayo leh u hubinaaya hirgelinta Istaraatiijiyada oo ay ku jiraan shuruudahan:

- In ay hubiyaan in dadweynaha iyo saamilayaashu ka qaybqaataan faah-faahinta qorshaha, hirgelinta iyo baadhida waxii la soo jeediyey.
- In la hubiyo isku mid noqoshada sii soconaaya ee Istaraatiijiyada la safka ah Qorshayaasha Jaaliyada.
- Wadaagida horusocodka hirgelinta Istaraatiijiyada ee saamilayaasha muhiimka ah.
- Aasaaska xidhiidhka Istaraatiijiyada iyo iskuduwida xidhiidhka qorshayaasha kale ee waaweyn ee kamidka ah qaybaha Wasaarada Caafimaadka Qaranka iyo Dowlada Hoose.
- Nidaamka dib-u baadhida wax-qabadka waa in loo sameeyo tilmaamayaal lagu waajaho su`aalahan soo socda:
    - Sax ma yahiin wax-qabadka Istaraatiijiyada iyo jawaabaha adeegyadu iyo wax ka soo baxu?
    - Ma dabooleen baahiyaha jaaliyada dhamaantood?
    - Cidee ayan la daboolin baahiyahooda?
    - Kharagareyntu wax ma ka tartay qiimaha?
    - Heerka keenida isu-taga shaqo fulintu ma dhaqan galayly,tusaale, side baanu u fuliney maamulida gudbinta daryeelkii dib u dhacay?
    - Sidii la rabay ma uga qayb qaateen dowlada hoose ee guriyantu, waxbarashadu, adeegyada degaanku, gaadiidku, adeegyada madadaala iyo waaxda caafimaadka bulshadu?

Kooxda Talada Qorshaynta waxaa iyana laga rabaa in ay hubiyaan in isticmaalayaasha adeega iyo daryeelayaashu ay ka qaybqaataan qorsheynta, iyagoo metaalaad toos ah ama ka qaybqaadasho joogto ah nidaamka guud. Qorsheynta qaabka guud waa in ay ku xisaab tamaan adeeg isticmaalayaasha iyo in soojeedinta ra`ayigooda wax lagu qabtaa. Sidani waxay sameeynaysaa xidhiidh is aaminaad dheeraad ah markaas oo ay adeeg isticmaalayaashu dareemayaan in la dhegeystey iyo sidaa darteena adeegyada la sii adkeeyey.

Heerka wax ka soobaxa Istaraatiijiyada ayaa laga yaabaa in aanu si dhakhso ah u iman. Laakiin wax-qabadka dhamaan shaqooyinka shuraakadu waa in uu waajahaa qaynuunka Istaraatiijiyada ee la xidhiidha fidinta isticmaalida khayraadka hada jira iyo horumarinta caafimaadka iyo ladnaanta dadweynaha.